



Tusmooyinka CityArtis (Farshaxanyahanka Magaalada) ee 2024

Dulmarka Deeqaha

Barnaamijka deeqaha CityArtist wuxuu taageeraa shaqsiyaadka fanka iyo farshaxanka ee reer Seattle oo ku jira cilmi-baarista, kobcinta, iyo soo-bandhigista ganacsiga hal-abuurka leh. Arjiga 2024 wuxuu u furan yahay **Suugaanta, War-isgaarsiinta/Dhijitaalka/Filimada** (oy ku jiraan **riwaayad-qorista**), iyo **farshaxanka** Muuqaalka. Fanaaniinta la abaalmariyo waxay u baahan doonaan inay bandhig dadweyne ku soo bandhigaan gudaha xadka magaalada Seattle.

CityArtist waxay ilaalisaa fannaaniinta, sameeyayaasha, iyo curiyayaasha kuwaas ah xudunta qeybta dhaqanka. Taageerada dhaqaaleed ee ganacsiyada hal-abuurka leh waxay gacan ka geysataa dhaqaalaha ballaaran iyo tayada nolosha ee xaafadaha magaalada oo dhan.

Macluumaadka iyo Kaalmada Codsiga, U-qalmitaanka ama Taageerada Farsamo ee khadka

tooska ah: La xidhiidh Maareeyaha Mashruuca Irene Gómez at (206) 684-7310 ama irene.gomez@seattle.gov.

Codsiga Codsiga waxaa lagu soo gudbiyaa KHADKA. Codsiga waxaa laga heli karaa bogga deeqda ee Magaalada Seattle ee FLUXX https://seattle.fluxx.io/user_sessions/new Haddii aanad lahayn kombuyuutar ama internet, la xidhiidh shaqaalaha sida ugu dhakhsaha badan.	Furitaanka Maarso 28, 2023 - 8 subaxnimo (Pacific) Waqtiga kama dambaystaa Maarso 9, 2023 - 5 galabnimo (Pacific)
Kulamada Macluumaadka: Nadwada 1 Talaado, Abriil 11, 11:30 subaxnimo - 1:30 galabnimo (Pacific) JAWAAB-CELIN	Kulamada Dib-u-eegista Arjiga Qabyo-qoraalka: Dib-u-eegista Qabyo-qoraal 1 Talaado, Abriil 25, 1 - 5 galabnimo (Pacific) JAWAAB-CELIN
Nadwada 2 Talaado, Abriil 18, 3 - 5 galabnimo (Pacific)	Dib-u-eegista Qabyo-qoraal 2 Talaado, May 2, 1 - 5 galabnimo (Pacific)

Saacadaha Xafiiska Taleefanka

Arbaco, Maarso 29 - May 3, 3-5 galabnimo
(Pacific)

Maalgelinta

Waxaad doorataa mid ka mid ah saddexda lacagood: \$2,000, \$5,000 ama \$8,000.

U-qalmitaanka/Shuruudaha

Waxaad u qalantaa deeqdan haddii aad buuxiso shuruudahan:

- Waxaad tahay farshaxan-yahan/abuure/ilaaliye soo saara/soo bandhiga farshaxanka;
- Waxaad tahay degane Seattle AMA aad leedahay istuudiyo/goob shaqo oo joogto ah oo magacaaga ku qoran gudaha xadka magaalada Seattle halkaas oo aad ka hesho boostada. Ma noqon karto Sanduuqa Boostada *;
- Waxaad tahay ugu yaraan 18 sano jir marka la gaaro waqtiga kama dambaysta ee codsiga;
- Waxaad tahay farshaxan-yaqaan shakhsi ah oo abuuraya nuxur asli ah ama waxaad tahay hormuudka fannaanka/maareeyaha koox fannaaniin ah
 - Haddii codsaduho yahay hogaamiyaha fannaanka/maamulaha fanka ama koox dhaqameed/urur
- Waxaad si cad u kala saari kartaa shaqada abaal-marintan iyo shaqada socota/xilliyeedka ee ururka.

Uma qalantid deeqdan haddii:

- Waxaad iska diiwaan gelisay dugsi (dugsi sare, shahaadada koowaad ee jaamacadda, qalinjabinta, ama dhakhtarka) barnaamij kasta oo shahaado ah oo la xidhiidha shaqadaada faneed ama takhasuskaaga;
- Waxaad tahay hele abaal-marin hadda jirta oo ka mid ah barnaamijyadayada oo leh qandaraas shaqeynaya.

Shuruudaha Qiimaynta

Soo-gudbinta waxaa lagu qiimeyn doonaa iyadoo lagu salaynayo saddex (3) shuruudood. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad ka jawaabto shuruudahan macluumaadka arjigaaga. Halbeeg kasta oo hoose waxa lagu qiimeeyaa **qiime isle-eg** oo dhan 60 dhibcood.

Waayo-aragnimada iyo suurtoagnimada (20 dhibcood)

- La wadaag waxa dhiirigeliya, saameeya ama qaabeeya shaqadaada iyo/ama waxa keenay isbeddelada ku dhaca shaqadaada.
- Sharax noocyada waayo-aragnimadaada, tababbarka, taariikhdaada ama shaqadaada ee farshaxan ama curiye ahaan.

Kobaca Fanka iyo Aragtida (20 dhibcood)

- Si cad u gudbi horumarkaaga cabbirka, mawduuca, ama farsamada wakhti ka dib. Muuji waxa booday ama sahaminta la qaaday ama la qaadi doono marka xigta.

Gumucda Shaqada (20 Dhibcood)

- Muuji sida muunadaha shaqadaadu u muujiyaan jawaabaha sheeko, heerka farsamada ama dariiqa xiga. Muunada shaqadaadu waa kuwo la akhriyi karo, la maqli karo, iyo/ama diiradda ku jira/muuqda.

Tilmaamaha Codsiga & Qaybaha

Codsigu wuxuu diiradda saarayaa ku-dhaqanka farshaxanimadaada, fikradahaaga, iyo korriinka wakhti kadib. Saddexda qaybood ee codsiga ugu muhiimsan waxaa ka mid ah:

- Laba Su'aalood oo Sheeko ah oo ka sheekeynaya sheeko ku saabsan sida adiga iyo shaqadaadu u horumartay muddo ka dib.
- Resume oo taxaya taariikhdaada himilo-garis, oo ay ku jiraan tababaro, dhacdooyin, waxbarid/casharro, degenaansho, maqaallo, iwm.
- Tusaalaha shaqada ee taageera jawaabaha sheekada iyo resume-ga.